# Golaha Wakiilada JSL

## <u>Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka</u>

### Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 2aad

### Axad 10/03/2019

**Fadhigu Waxa uu furmey 10:00 AM**

### Gudoomiyaha: - Baashe Maxamed Faarax

**Quraan: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Ajendaha Fadhiga: -**Doodda Ajendaha kal-fadhiga 39aad maalintii kowaad

**Gudoomiyaha: -***Fadhigii shaley waxaa mudanayaal la idiin qaybiyay ajendaha kal-fadhiga 39aad, markaa manta waxaynu bilaabeynaa doodda ajendaha xildhibaanada raba in ay ka doodan ha is qoraan, xog-hayntuna ha u qaybiso waraaqaha.*

**Md. Maxamed Axmed Maxamed (dhakool):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu Calaykum,, Mudane Gudoomiye ajandaha halkan yaala anigu waxba ka badali maayo sidii aad u soo diyaariseen ayaan u daynayaa, waxaanse ka hadlayaa 2ba arrimood oo tan 1aad uu khuseeyo siyaasadeena Arrimaha Gudaha una baahan in la hadlo, taas oo ah in Somaliland lahayd xeerar wada hadalada iyo hansami u socodkeeda hadii ay noqon lahayd habka nabadgalyada, hab-dhaqaqan iyo mid siyaasadeedba oo somaliland ay lahay shuruucdeeduna ay ku salaysnayd ayaa jiray, hada sida aad maqlaysaan waxaa jira shirar dibada laga qabanayo oo ah shirar qabiil oo salaadiin iyo niman siyaasiyiin ahi ay dibada ku hayaan, waxaa kale oo jirtay qofka garoowe ama boosaaso iyo xamar tagaa ee shirarku soo qabta Somaliland Xeerar bay ka lahayd, hadana waxaa jira Xeerar public ah oo aad moodo in magicii somaliland lagu beddelay oo ah xeerar Direed iyo shuruuc direed, markaa waxaan leeyahay waa in laga hadlaa hadii magicii somaliland dir loo badelay.

**Gudoomiye Baashe**, Xildhibaan Dhakool ajandaha ka hadal.

**Md. Dhakool:-** Mudane Gudoomiye qodobkaa waa la igu taageeray, arrinta 2aad ee aan rabaa in aan ka hadlo waxaa weeyi xeerkii Kaybalka am xeerkii isgaadhsiinta oo in badan laga hadlayay, waa in wax-ka beddel iyo kaabis lagu sameeyaa oo dib loo eegaa waanad mahadsantihiin, waanan ka baxay.

**Gudoomiye Baasha**:- waxaan xildhibaanada u sheegayaa in aan Golaha dhexdiisa wax qabyaalada ah aan laga hadli karin, waa in ajandaha lagu koobnaadaa.

**Md. Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac (Awxoog):-** Bismilaaha Raxmaani Raxiim, waxaan salaamayaa shir-gudoonka sharafta leh iyo mudanayaasha, Golahani waa Gole siyaasiya oo siyaasada wadankana isaga ayaa jaan-gooya wax kasta oo ku soo kordha somaliland waa laga hadli karaa, waxaanan si buuxda u taageerayaa qodobkii uu xildhibaankii iga horeeyay ka hadlay oo aan doonayaa in ajandaha lagu soo daro.

Anigu qabiil afka ku dhufan maayo, laakiin sida aan ka war hayno doorashadii wadanka ka dhacday dhawaan kala qaybsanaan badan ayay ku keentay wadanka, iyadii ayaa la raray oo wadamada jaarka loo raray oo la doonayaa in iyagana lagu kala qaybiyo, mar hadii ay sidaa tahay waa in aan ka hadalnaa wac-yiga dadka aynu matalo ceebna uma arko ee yaan xildhibaanada la cabudhinin.

Hadii aan u soo noqdo ajandaha sida ku qoran Qodobka 1aad oo ah Qabyo qoraalka xeerka Xawaaladaha iyo Qodobka 7aad oo ah Xeerka Maydhista lacagta labadaa Qodob waxaan soo jeedinayaa in ajandaha laga saaro waayo xeerkii guud ee maamuli lahaa waxaas oo dhami ma samaysna markaa waxaan qabaa in ay tahay dano dad ganacsato ahi leeyihiin oo marka la leeyahay Xawaalada waa Ganacsi sidaa awgeed labadaa qodob waan ka saari lahaa.

Qabyo qoraalka Xeerka Macdantaha waxaan jecelahay in aanan waxba ka odhan ilaa aan dhagaysto warbixinta Guddida khayraadka Dabiiciga ah, sidoo kale qodobka saddexaadna waa la mid oo marka guddida Arimaha Gudaha la dhagaysto ayaan eegi, waayo suqa waxa laga hadal hayaa in uu madaxweynuhu kala dirayo Golaha deegaanka, waa in aad looga hadlaa oo gudidaa la dhageystaa ayaan ku koobayaa.

Qodobka kale ee xiga ee ah Xisaab xidhka 2017-ka waa in laga dhigaa qodobka 2aad sababta oo ah buuq faro badan iyo tuhun ayuu bulshada dhexdeeda dhaliyay xisaab xidhkaas 2017-ka waa in la cadeeyaa lacagihii la sheegayay ee la'lahaa waa la cunay.

Qodobka 3aad waxaan ka dhigi lahaa Qabyo qoraalka Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada JSl oo kuwa nabada aynu ku naaloonayno haye, sidoo kale xeerka doorashooyinku waxa uu u baahan yahay in kal-fadhi dhan loo daayo sii loo kala guro waayo waa shan xeer oo la isku daray.

Sida aan halkan ku arko waxaad moodaa in shidaalkii iyo macdantii aad loo danaynayo waxayna noqon kartaa wax lagu badhaadho ama waxay noqon kartaa habaar marka la isku taataabto ilaahay habaar inagagama dhigee xeerarkaa aynu ka fiirsano xeerarka badan ee aan meesha ku arkayana u malayn maayo in kal-fadhigan lagu dhamayn karo, waxaan filayaa in mid kaliya uun laga shaqayn karo.

Qodobka ugu danbeeya waa xeerka aan anigu u faro dhuudhuubanahay hadii ay noqon lahayd mid nadiyadii Qoraal, saxafiyadeed, film sameyneed iyo wixii la yidhaa ee hoos imanaysay saxaafada, xeerkaa saxaafadu waa xeer dhaqangal ah oo madaxweynihii Daahir Riyaale kaahin ilaahay raali ha ka noqdee uu saxeexay oo dhaqangalay, anigu garan maayo wax xeerka loo daba socdo, xeerkaa meesha waan ka saari lahaa waayo waxaan isticmaalaa xeerka ciqaabta somaaliyeed iyada oo uu xeerkani yaalo, sida aan

qabo Baarlamaanka ayaa ka seexday in xeerkaa la fuliyo, maxkamaduhuna xeerkan may dhaqangalin oo waxay dadka ku xukumaan xeer uu sameeyay nin dhalashadiisu ahayd Talyaani oo la taliye u haa maamulkii sharci dajinta ee Maamulkii Somaaliya, xeerkaa oo la sameeyay 1962-kii ninkaa oo la odhan jiray Renaldo Ancelloti, markaa sida uu Dastuurku sheegay waa in xeerarkii hore laga guuraa oo aan xeer samaysano, xeerkaana meesha waan ka saari lahaa, waad mahadsantihiin.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo saxaafada ASC, waxaan jeclahay in aan ku koobnaado sida uu u kala horaynayo Ajanduhu, Gudoomiye sida aan ka hadlay mararbadan xeer-hoosaadka golha wakiilada oo halkan ka maqan ayaan jeclahay in ajandaha lagu soo daro, waayo waa in ay mudanayaasha wixii qabanayay la helaa oo ay gartaan waayo waxaa inaga dhex dhacaya buuq, kaas waxaan soo jeedinayaa in halka hore la soo galiyo.

Sida aan inbadan maqlaynay waxaa jira in laga hadlo cadaalad daro badan oo jirta, cadaalad daradana waxaa xukumaa waa sharci, ajandahana waxaa ku jira xeerka Nidaamka Garsoorka waxaana soo jeedinayaa in xeerkaa xaga hore la soo mariyo si looga shaqeeyo oo kii hore ee jiray iyo kan la isku eego waxna laga baddelo.

Waxaa kale ee aan ku xejinlahaa xeerka Doorashooyinka, waayo waad ogtihiin dacaayadaha la inoo fidiyay ee la leeyahay in meesha baneeyaan ma ogola, xeerkii wax lagu dooranayayna wuu ina horyaalaa oo waa qabyo mudo yarina way inoo hadhay ee waa in xeerkaana xaga hore la soo mariyaa.

Waxaa kale oo aan taageerayaa in sidii uu sheegay Xildhibaan Cabdiraxmaan Xoog ee uu kaga saaray labadii xeer, gaar ahaan xeerka macdanta sida aan ka warqabno Madaxweynihii waxaa uu ku maqanyahay dalka Imaaraadka oo uu wasiirkii macdantuna u raacay, markaa waxaa soo bixi karta in mashruuc cusub la inoo keeno oo ku saabsan xeerka macdanta markaa waxaan leeyahay dib ha loo yara dhigo inta aynu wax hubsanayno.

Xeerka saxaafada hadii uu xeer jiro waa in uu dhaqangalaa oo uu noqdaa kii saxaafada lagula dhaqmayay, hadii aanu jirina ha la cadeeyo oo meesha ha la keeno iyada oo aan la xidhiidhinayo xeerka Nidaamka Garsoorka si aynu u ogaano wixii loo baahanyahay ee inaga dhiman, intaa ayaan ku soo koobayaa waad mahadsantihiin wasalaamu calaykum.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin:-** Bismilaaha Raxmaani Raxiim, Saddex qodob waxaan odhan lahaa Ajandaha ha lagu kordhiyo qodobka 1aad waxaa weeyi Isbadellada iyo dabaylaha ka socda geeska africa, in munaaqisho laga galo dawladana talo laga siiyo waan soo jeedinayaa.

Waxaa kale oo aan leeyahay ajandaha ha lagu daro Xeerkii Baananka Ganacsiga oo xeerar badan oo ajandahan ku jira ayuu gun dhig u yahay waayo hay'addo ganacsi, sidaa awgeed xeerkaa oo in badan marna korkeena marna horteena ka lushay ha lagu soo daro ajandaha.

Waxaa kale oo aan leeyahay ha lagu soo daro ajandaha xeerkii shaqaalada oo ay ansixiyeen khamiistii dhawayd Golaha Wasiiradu oo laga yaabo in uu wiigan inaa yomaado, saddexdaa qodob ayaan soo jeedin lahaa in lagu daro ajandaha kal-fadhigan aynu bilawnay.

hadii aan u galo kala horaysiinta xeerarkan ajandahan ina horyaala ku qoran oo ay ka midka yihiin xeerarka doorashooyinka iyo kuwa aanay ka maarmin oo ka kooban 4xeer oo ka mid yihiin Xeerka doorashada Guud, xeerka ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka, xeerka doorashada Golaha Wakiilada, xeerka madaxtooyada iyo xeerka diwaan galinta waa in ay ajandaha ugu horeeyaan. Taa markaan ka tago xeerka gobolada iyo Degmooyinka oo isaguna xeer muhiim u ha doorashada iyo hawlaha maanta yaala waa in isagana lagu soo daraa oo ay noqdaan qodobka 2aad.

Qodobka 3aad ee aan doonayo waa xeerka nidaamka garsoorka oo nidaamka garsoorka ee dalkeenu ilaa hada aanu lahayn xeer lagu maamulo, waana meelaha xaasaasiha ah ee uu maanta dalkeenu ka Go'ayo oo laba xeer ayaa yaala oo garsoorayaashu midba mid haystaa kuu doonan ku xukumaa, xeerka maanta yaalaa waa xeerkii aanu samaynay 2008-dii ee aanu madaxtooyada u gudbinay dhawaana aan gudida cadaalada u keenay copy ka mid ah, xeerka waa in qodobka saddexaad waa in laga dhigaa. Waa xeerka maamulka guud ee garsoorka iyo guddida Cadaaladuba ay ku shaqayso.

Waxyaabahan hadii ay noqon lahay sahaminta, xawaalada iyo macdantu macno badan samayn maayaan hadii aan la samayn xeerka baananka ganacsiga ee xagaa danbe inaga ururiya oo kuwa wax tarka leh ee umada anfacaya ha la soo horaysiiyo, WSC.

**Marwo. Baar Siciid Faarax:-** Bismilaaha Raxmaani Raxiim, xeerarka halkan ku qorani aad ayay u badan yihiin oo waa ilaa 12qodob, kal-fadhi kastana inta wax la soo qoro ayaa isaga oo aan dhaweyn ama aan dhamaan fasax laga galaa ama uu Golugu xidhmaa markaa anigu waxaan ka soo qaadan lahaa 12kaa qodob 6qodob oo kaliya mid ahaan anigaa ku soo kordhiyay 5ta kalana waxaan ka soo saaray ajandaha waxaanan soo jeedinayaa in 6daa xeer laga dhigo kal-fadhigan waxyaabaha aan ka shaqaynayno iyo wixii laga maarmi waayo ee lagu soo dari karo.

1aad waxaan ka dhigay xisaab xidhka 2017-ka oo xaaraan ah in uu xiligan maqnaado. 2aad waxaan ka dhigay Xeerka Nidaamka Garsoorka oo garsoorkaa aad ayaa looga qay linayaa dalkeena ee waa in xeerka labaad ee laga shaqaynayo laga dhigaa. 3aad waxaan ka dhigay xeerka Ismaamulka Gobolada Iyo Degmooyinka. 4aad waxaan ka dhigay xeerka doorashooyinka oo xeer culus ah oo xeerarbadan oo isku jira ah sida mudanayaashii iga horeeyayba sheegeen.

5aad waxaan ka dhigi laaa xeerka hawl-galba iyo xaqsiinta Ciidamada Jsl, oo waxaad arkaysaa nin 80 ama 90jiray oo qori degta ku sida xaq ayayna u leeyihiin dadkii 60 sano soo shaqaynayay la na siyo oo dhalin yarada la hawl galiyo, shantaa qodob ayaan ka soo saaray ajandihii hore ee la soo qoray.

waxaan ku soo kordhiyay oo aan ku darayaa Ajandaha xeer hoosaadka Golaha Wakiilada, gole dhan oo xeer hoosaadkii uu u shaqayn lahaa aan la ahayn waxay ila tahay in ay nasiib daro tahay oo aanay jirin xildhibaanada ka maqnaada iyo ka shaqeeya, yacnii waa isku mid oo mar hadii aanu jirin xeer qabanayaa, cid shaqo u dadaalaysa la heli doonaa mooyi, angu waxaa ka mid ahaa guddida joogtada ah xeerkaasu wuu dhan yahay garan maayo waxa uu shirgudoonku u haystaan waana in ajandaha lagu soo daraa xeerkaa, Salaamu Calayku waraxma tulaahi wabarakaatuhu.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud:-** Bismilaaha Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, mudanayaasha, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa, marka aan eegay ajandaha waxaan leeyahay xeerarka wax ku oolka ah bulshadana waxa u taraya waa in loogu soo horaysiiyaa ayaan soo jeedin lahaa marka ugu horaysa. mar walba waxaa aynu samaynaa Ajande isaga oo aan dhamaana weynu ka tagnaa waxaana muhiima in wixii kii hore inaga baaqday kan lagu soo daro.

Sida laga dhawaajiyay siyaasada arimaha diba wax badan ayaa iska badellay markaa wixii is badel ah waa in aan la jaan qaadnaa, sidii uu mudanihii iga horeeyay sheegay waxaa jira shirar la qabanayay kuwaas oo aan ahayn wax wanaangsan loomana baahna in Somaliland loo kala Ab-tiriyo waad mahadsantihiin.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Bismilaaha Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, Golaha Wakiilada, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa, anigu wax badan ka baddeli maayo, Ajandahan waxaad moodaa in uu meel kaliya u socdo oo uu ka hadlayo shidaal, dakhli ururin iyo waxyaabo noocaas ah markaa anigu waxaan ugu horaysiin lahaa waayo maalmahan aad ayaa looga qaylinayay, sida la sheegayo xeerkooda laguma dhaqo ee waxaa lagu dhaqaa baynal koodhkii, kaasina wadi maayee waa in xeerkan la dhaqan galiyaa, wixii uu u baahanyahayna waa in lagu daraa oo wax ka beddal iyo kaabis lagu sameeyaa.

Waxaan qodobka 2aad ka dhigi lahaa xeerka Nidaamka garsoorka, sidoo kale waxaan ku soo darayaa xeerka Bangiyada ganacsiga waa in la keenaa waayo xeerarkan meesha ku jira la'aantii kama shaqayn karno ee waa in xeerkaa lagu soo daraa Ajandaha, xeerarka kale sidooda ayaan ku daynayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Cabdiraxmaan Yusuf Cartan:-** Bismilaaha Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, Golaha Wakiilada, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa, ugu horayn waxaan taageerayaa in Ajandaha lagu soo daro Xeerka ka ganacsiga Baananka, mudane gudoomiye xeerkaasi golaha wuu soo galay, goluhuna ma ogoga sababta uu ugu baxay xeerkaasi Golaha iyada oo laga dooday tacab badanina uu galay waana in mudanayaashu ku wacyi gashanaadaan ama ay ogaadaan sababta uu uga baxay Golaha, mana aha inta uu xeer golaha soo galo hadana uu ka boxo bilaa sabab la'aan.

**Gudoomiye baashe:-** Xildhibaan Cantan Adiga oo raaliya xeerkaa bangiga waxaa lagu celiyay Madaxtooyada waxaana ka yidhi Diinta Islaamka ayuu ka soo horjeedaa, iyaga ayaana laga sugayaa in soo celiyaan Diintana soo waafajiyaan markaas ayaa ajandaha lagu soo darayaa, sidoo kale Golahani waxa uu leeyahay Xeer-hoosaad la Ansixiyay.

Md. Cartan: Gudoomiye waad mahadsantahay, hadii gudoomiye la doonayo in xeerkaasi socdo madaxtooyaduna ma haysan karto cid kalana ma haysan karto waa in xeerkaa laga hawl galaa.

Dhinaca kale waxaynu haynaa xeerar maaliyadeed oo ay ka mid yihiin Maydhista lacagta iyo Xawaaladaha xeerkii qaranka ee dawladuna waa kaa hada inaga maqan, sidaa awgeed waa in xeerkaa laga hawl galaa oo golahan la keenaa gudoomiye.

Qodobka kale ee aan ka hadlayaa waxaa weeyi xeerka doorashada guud oo dadkii aan ka wakiilka ahayn ay aad u danaynayaan, sidoo kale xukuumaduna wey danaynaysaa, markaa gudoomiye yaan la inoo arkin niman iyagu wax car-qaladaynaya

**Md. Axmed Maxamed Nuur:-**Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Marti-sharaftaba marka hore ASC, Mudne Gudoomiye halkan 12 xeer baa ku qoran anigu horta waxba ku kordhin maayo laakiin iyaguun baan soo kala horeysiinayaa, waxaana ka dhigayaa:-

- **Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta codbixiyayaasha,** sababtoo ah dadkii oo dhan waxay leeyihiin qoladani qolo kacaysa maaha, xaqdaray meesha ku fadhiyaan ilaa siyaasiyiin waaweyn baa waxaas ka hadlaya, waxaana aniagu arkaa Goluhu xaqdaro kuma fadhiyo ee waxa kaliya oo badali kara Golahan gole cusub oo la soo doortay, waynu u baahanahay inaga laftigeenu inaynu dhagtuun u raaricino maahe dadka meelahaas ka caytamaya intay masraxa isasa toogaan siyaasiyiin waawayni, marka waxaan soo jeedinayaa inaynu dadkaas u yeedhno oo Golaha ka cadeeyaan xaqdarada ay leeyihiin waad ku fadhidaan, waxaana leeyahay inagu doorasho ma qabano ee Xukuumada xaqabada inagana waxaa inagu waajib ah inaynu xeerka kan kowaad ka dhigno oo inagu is-baraxno horta inaynaan dib u jiidanayn arrinta.
- **Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka** oo aan u arkno inuu yahay xeer aad muhiim u ah waana xeer aad loogu baahan yahay, waxaana ka dhigayaa xeerka labaad.
- **Wax ka badalka Xeerka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka** ayaan xeerka saddexaad ka dhigayaa.
- **Wax ka badalka Xeerka Saxaafada,** saxaafadu sidaynu ka war-qabno way dhibaataysan yihiin oo in badan baynu aragnay iyaga oo laga jajabinayo kamaradihii, iyagoo la iska xidhayo oo markhaati baynu ka nahay, Xeerkanina sidaynu Golaha u soo galnay kal-fadhi walba wuu ku jiraa hadana mar walba waa loogu dambeysiiyaa, markaa xeerkaas Saxaafada aynu xaga hore soo marino oo xeerka afraad baan ka dhigayaa.

- **Qabyo Qoraalka Xeerka Hawl-gabka iyo xaqsiinta Ciidanka Qaranka** ayaan Xeerka shanaad ka dhigayaa.

Anigu intaasaan u soo horeysiinayaa, inta kale idinku sidaad rabtaan u soo kala horeysiiya, mida labaad halkan waxaa ka muuqda Xeerar badan oo dakhi shidaal, soo saaris iyo tamar, mudaynu lahayn waxbaa la soo saarayaa wax cad oo aynu aragno ma

jirto, kal-fadhi walbana Xeerarkaasi way ku jiraan, waxaan leeyahay aynu iyaga u wada dambeysiino waxba kama soo socdaane, WSC.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, iyo bahda Saxaafadabaaad baan u salaamayaa, wixii aan odhan lahaa xildhibaanadii iga horeeyay baa sheegay, Xeerkan la yidhaahdo Xeerka Maydhista Lacagta sidii ragii hore u sheegay aynu ka saarno meesha waayo banking systemba ma jiro lacagtayna aynu maydhaynaa waa maxay, qaynuunka ina hayaana waa maxay xudun baynu ku naale, marka Xeerka ha laga tuuro.

Waxaan aad iyo aad u taageerayaa Xeerkii Bangiyada Ganacsiga oo aad Gudoomiye Sharaxday halkuu ku dambeeyay, sidii Xildhibaankii iga horeeyay ee C/raxman Yuusuf Cartan Sheegay baan qabaa, hadii bangiyadaas ganacsiga uu wadanku yeelan waayo waa curyaan dalku, xoolaynu leenahay, beeraynu leenahay, waxa wax maalgaliyaa waa baanankaas ganacsiga, hadii private sestorku fadhiisto wax alaale iyo waxaynu naf yeelanaynaa ma jirtee dhawaaqeenu ha gaadho xukuumada.

Waa tii culimadii inoo timi oo Wasiirkii Diinta iyo Awqaabtu halkan inoogu yimi, waynu u sharaxnay sida loogu baahan yahay ee aanu baan la'aan statekani noolaanayn, waxaynu haysanaa waliba Imaaraadkii oo iminka Madaxweynihii ku maqan yahay oo ilaahay nimco siiyay ayaynu maanta xidhiidh la leenahay, waxaynu nahay umad yar oo 4 milyan ah hadii ay baanankooda halkan ka furtaan oo mashaariicda biya qabadka iyo inta banaankaas baa ina siin lahaa.

Markaa Waxaan soo jeedinayaa dhowaaqeenu ha gaadho xukuumada oo ha la soo de-dejiyo baan islaamiya ha noqdo ama baananka kale ee ganacsi ha noqdaane waa loo baahan yahay, halkaa aynu xooga saarno, waayo waxaa jira baanan afrika sidaa ugu fidaya oo aynu xidhiidh 25 sanadood ah leenahay aad iyo aad baa loogu raysan lahaaye, Xeerkaas Ganacsiga aynu helno, sida kale ee ajandaha loo kala horeysiinayo xidhibaanadaan ku taageersanahay.

**Md. Xeseen Axmed Caydiid:-** Gudoomiyaha Golaha, Mudanayaasha, Mari-sharafta, Saxaafada iyo Shaqaalaha Golaha dhamaan ASC, Gudoomiye dee Ajandaha uun baynu ka doodaynay sida ay muhiimada u kala leeyihiin iyo wixii lagu kor-dhin karo, anigu waxaan ku horeynayaa qaabka kala horeynta, waxaana u kala horaysiinayaa:-

- **Xisaab-xidhkii 2017** waayo waxaan u arkaa inay daahsan tahay oo hada oo kale aynu ka hadli lahayn Xisaab xidhkii 2018kii, marka hadii taasi dib u dhacsan tahay aynu iska hor-marino.
- **Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Saxaafada:-** Xeerkaas oo ahaa xeer jiray sida la sheegay laakiin dhaqangalkiisa ay dhibaato ka taagnayd waxaan odhan lahaa wuxuu u baahan wax ka badal iyo kaabis, ciqaabna Xeerku intaan ka warhayo gudaha wuu ka waajibinayaa, dacwado madani ah in la isu raaco wuu waajibinayaa oo labadaba wuu xambaarsan yahay, muranku labaas uun buu ka taagan yahay, markaa waxaynu u baahanahay inaynu ku kala cadayno ma xeer ciqaabeed baa loo raacayaa mise kan gudihiisa ayaa lagu ciqaabayaa intaas uun in

la kala saaro ayuu u baahan yahay, markaa hadii dhowr kal-fadhina yaalay isaga aynu soo qadino oo wakhti badanba qaadan maayee inta khilaafku ka taagan yahay ha la hagaajiyo.

- **Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka,** Xeerkaas oo mudo dheer soo socday, 2011kii Shirwaynihii Cadaaladda ee Hotel Ambasador lagu qabtay ayaa laba Xeer oo dhex wareegaya garsoorka oo ninwaliba kuu doono cuskado labadooduba degreeto Madaxweyne oo isku mid ahi saaran tahay ayaa inta la soo mideeyay midayntiisa la keenay, markaa Xeerkaasai mudo dheer qaadan maayo oo wax ka badal maahee waa isku dhafid labada xeer oo xeer la isaga dhigay wuxuu u baahnaana lagu daray wuu iska dhanyahaye isna aynu ka saddexaad ha inoo galo.
- **Xeerka Guud Doorashooyinka** ayaan odhan lahaa isna ha lagu xejiyo, oo sida mudanayaal badana ay soo jeediyeen hadaynu xaga hore la keeno, Xeerkaasi arrimo badan buu xaniban yahay oo political solution u baahan, arrimo u baahan ini xal siyaasi laga gaadho oo aan qaarkood iminka la bilaabin ayuu doonayaa inuu xambaaro Xeerkaasi, wax ka badalo iyo kaabisyo hore ayuu soo maray oo 5 jeer baa iyadoo heshiis lagu yahay wax ka badal lagu soo sameeyay iyadoo Komishanka Doorashooyinka iyo Xisbiyadu ka soo shaqeeyeen oo Madaxweynuhuna sidaa ku soo gudbiyay ayuu labada aqal ku maray si sahlan.

  Iminka halkaa carqaladaa ka taagan oo waad ka warhaysaan, carqaladahaas iyo khilaafkaas ayuuna u xaniban yahay xeerkaasi, markaa waxaan odhan lahaa aynu u yar kaadino oo aynu afar iyo shan ka dhigno ama meelaha dhex aynu ku baxnaanino inta meel la isla dhigayo oo xal laga gaadhayo, saamigii baa ka mid ahma sidii hore ayaa lagu galayaa ilayn qodobkaasi xeerkanuu galayaaye, hadii qodobkii ha la badalo ayaan helin, sidiisa ha loogu dhaqmona ayaan helin maxaynu ansixinaa, meelo badan Xeerkaasi dimuqraadiyada ayuu hagaajin jiray, meelo badan oo dimuqraadiyadu ay ka xuntahay baa ku jira oo iminka sidii loo hagaajin lahaa baa iminka lagu jiraaye yaynaan mindi roortayn oo de-dejin wuu inaga dambeeyaa hadalkiisiiye, halkiisa ha ku jiro ayaan odhan lahaa.

  Xeerarka kale ee Xeerar guud sugayaana waa lagama maarmaano hadaynu chapters' hoose ku xiiqno inagoo xeerkii midaynayay aan hayn, Xeerarka Xawaalaadaha iyo maydhista lacagaha chapter chapter bay u noqon lahaayeen Xeerka guud, markaa Gudoomiye sidaad sheegtay hadii xeerkaasi ku maqan yahay Xukuumada ha la soo de-dejiyo si aynu kuwa kalena u raacino, anigu intaas uun baan kaga baxayaa. WSC.

Guddoomiyaha: Mudanayaal waxa inoo sii socota doodii ajendaha, waxaan ku soo dhawaynayaa

**Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac-nac):-** Asalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatu waxaan salaamayaa dhamaan Xilshibaanada iyo Shirgugoonka sharfta badan, Gudoomiye anigu waxaan ugu horysiinayaa Xeerka Doorashooyinka Qaranka oo

aad iyo aad naluugu xanto in aan Doorashooyinka inagu aan dib u dhigeyno, si dadka shakiga uga saaro aan soo horeysiino.

Waxaan kaloo aan ku xigsiin lahaa in laga ka labaad dhigo xeerka shirgadaha oo laga dhigo mid shirkaduhu u siman yihiin oo tartan loo galo, Waxaan kaloo ku xigsiin lahaa Xeerka Tamarta oo inaga gudbey Goleheena kaas oo uu soo celiyey madaxweynuhu dibna nuugu soo celiyey markaas waa in ka daba tagnaa oo ogaanaa waxa lagu soo celiyey, waxaaan kaloo ku xigsiin lahaa Xeerka Xawaaladaha, iyo xeerka ganacsiga

**Md. Maxamed X. Yuusuf Axmed (Waabeeye):-** Gudoomiye Golaha Wakiiladadu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka hadlo waxkastoo Arin siyaasadeed ah mar hadii uu yahay Gole siyaasi ah , waxaan la qabaa Xildhibaanadii ka dhawaajiyey soomaliland Distoorkeedu wax uu sheegayaa Dadka wada degan iyo juquraafi ahaan eeriyada ay tahay , hadaba Goleheenu xaq ayuu u leeyahay waxkastoo ka socda Jaarkeena ama sida shirarka ka socda Wadanka debediisa sida shirka adisaba kaas oo kuseynaya arimaheena ,waana mid dareen gelinaya arimaha Somaliland

Waxaan taageersanahay Wasiir ku xigeenka Arimaha Debeda in uu yidhi shirkaasi nama khuuseeyo anaga, hadana si kale ayuu uga Hadley Safiirka Ethiopia ee Somaliland, hadaba waa in dawlada Somaliland si cad uga hadashaa oo meel cad ka istaagtaa shirkaas, waana in laga digtoonaadaa wixii keeni kara madmadow.

Waxaan kaloo anigu odhan lahaa Ajantaha in Golihii Degaanka uu xilkoodii ku eg yahay 29 bishan mudo laba weeks ah ayaa u hadhey mudadoodii, Golaha **Guurtiduna** muu sameyn wax kordhin aha, halakaas waxa ku jira gaab sharci, hadaba gaabkaas sharci ee halkaas ku jira in aan Golaha Wakiiladu masuul ka aha masuuliyadeedana waxa yeelanaya Dawlad waayo iyadaa ka reebtey muda kordhintii guurtida, una maleyn maayo in laba week waxa lagag gaadh siinayow

Gudoomiye waxaan taageersanahay in xeerka Doorashooyinka aynu ka dhigano lamber one,xeerka Garsoorka oo Ajantahay nuugu jira waxaa GUdoomiye jira in wadanku leeyahay lacag qaran oo ah shillinka Somaliland ,hadana Maxakamadaheenu waxa ay waxa ku ganaaxaan lacago qalaad ,taasina waa ceeb iyo fadeexad hadaba waa in xeerka gaarsoorka did u eegno waxa ka dhimana ka bedellaa.

**Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** Bismi laahi Raxmaani Raxiim Anigu waxaan odhan lahaa dadka loo yeedhayo ee Golaha looga baahan yahay inay yimaadaan inay u horeeyaan komishanka doorashooyinka , wixii u baahan in la qabyo tiro waa in ay qabyo tiraan inta aynaan ka hadal doorashooyinka waa in qoladaas la helaa, takale waxaan soo jeedinayaa inta aynaan ka hadal Xeerka doorashooyinka waa in dib u eegno XeerI4, waxaan ku jira Qodoba badan oo u baahan in la qabyo tiro Xeerkaas ururada iyo asxaabta , hadii xeerkaas wax laga qaban waayana waxaan u maleynayaa in doorasho noo qabsoomaysa

Hadaan u soo noqdo Ajantaha Xeerka waxkabebelka nidaamka garsoorka Somaliland oo aad moodo in weli wax mideysan ka soo bixin maxakamadaha Somaliland xisaab xidhkana waan ku xig siin lahaa. Nidaanka Garsoorka muran badan ayaa ka taagan waayo maalin walba waxa dhaca muran badan oo iyaguna wax tirsanayaan waxna laga tirsanayo, Qabyo qoraalka hawlgabka ciidamada, waxaanad moodaa in ay ciidamadu wax badan inaga beeganyihiin, mar horana aanay daryeel badan qabin, markaa arintaa hawl gabka in aan soo qadino weynu u baahanay.

Waxaa kale oo aan soo saacinayaa xeerka bangiyada, bangiyada maaha macneheedu maha cidbaa duulimaad lagu yahay ee waxaa weeyi ma loo baahanyahay mise looma baahna? Markaa hadii uu dalku u baahanyahay waa in la helaa xeerkaa hadii aanu u baahnayna ayaan xukuumadna laga sugin oo yaynaan isku hawlin.

Marka intaa laga gudbo xeerka doorashooyinka wax badan ayaa inaga gudban, markaa waxaa ku gudban si dadweynuhu ay inoola arkaan oo cid walba oo danaynaysaa inoola aragto waa in aynu doodiisa galaa waxaanan ka dhigayaa qodobka shanaad. Waxaan ku soo khatimayaa mudane gudoomiye halkan umaynaan iman in nin waliba marka uu hadlo in uu kadinka ka boxo waa in ay wax inooga yaaliin marka uu shirku inoo furmo habka loo fadhiyayo. Wasalaamu calayku waraxmatulaahi waa barakaatuhu.

**Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** Bismi laahi Raxmaani Raxiim, waad mahadsantahay Gudoomiye, shirgudoonka iyo Golaha sharafta lehba waan salaamayaa, salaan ka dib waa sharaf in uu golhani furmo, ajandahan wanaagsana ay shir gudoonku golaha soo hor-dhigaan, mudane gudoomiye ajandayaasheenu had iyo goor wey badan yihiin oo 12qodob iyo wax ka badan ayay ka koobmaan inta badan, sida aan wada ognahayna wakhtiga ayaa ka dhaca inaga oo kala badh aynaan gaadhin, asbaabaha oo ay ka mid yihiin hawlo qaran oo soo dhex gala ama xeerka oo mudadii uu u baahnaa in laga doodo aan helin ha ahaatee, sidaa daraadeed waxaan soo jeedinayaa ajandahan ka kooban 12-ka qodob in lagu soo koobo 5-qodob oo aan ugu horay siinayo Xeerka Nidaamka garsoorka, qabyo qoraalka Xeerka Hawl gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada iyo shaqaalahana waan ku kordhinayaa JSl, xeerka doorashooyinka, xeerka sahaminta iyo soosaarida shidaalka, xeerka ugu danbeeyay ee aan ku soo gabo-gabaynayaa mudane gudoomiye 5-ta qodob waxa uu yahay xeerka Tamarta, waxaanan rabaa in aan shantaa qodob ku soo gaba-gabayno kal-fadhigeenan iyada oo ramadaana kaabiga inagu soo hayso wasalaamu calaymku waraxmatulaahi Wabarakaatuhu.

**Gudoonka:-** Dooddi bari ayay inoo sii soconayaa waa inoo bari hadii alle yidhaa, fadhiguna wuu xidhan yahay.

# Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 3aad

## Isniin 11/03/2019

**Fadhigu Waxa uu furmey 10:00 AM**

**Gudoomiyaha: - Md.** Baashe Maxamed Faarax

**Quraan: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Ajendaha Fadhiga: -** Maalintii 2aad ee doodda Ajendaha kal-fadhiga 39aad

**Gudoomiyaha: -**Fadhigii shaley waxaa mudanayaashu ka Doodeen ajendaha kal-fadhiga 39aad, markaa manta waxaynu halkii ka sii wadaynaa dooda ajendaha waxaanan ku soo dhaweynayaa:-

**Md. Xuseen Maxamed Cige: -** Bislilahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka Sharafta leh iyo Golaha Wakiilada ee sharafta leh, martida iyo jaraa'idkaba Asalaamu Calaykum WA Raxamatulahi WA Barakaatu. Dooddihii halkan ka dhacay shalayto ee ku saabsanaa ajandaha, anigu waxaan qabaa intii aan meeshan joogay sidii shalay loo dooday ama loo hadlay looma hadal hore. Si wanaagsan oo hufan, waxaan ugu hambalyeynayaa Golaha inay Xildhibaanadu u muuqdaan in si wanaagsan haddii Alle ka dhigo loo shaqayn doono. Haddii aan ajendaha aan u dhaadhaco, markii 12-tobanka xeer ee aad halkan ku soo qorteen, 12-kuba waxay ku qoran in ay ku maqan yihiin Guddiyada oo mid qudhaba aynaan haynin, dee haddii aynu leenahay aynu kala horaysiino oo aynu qorano, maxaynu qoranaaba haddii aynaan haynba.

Waxay ku qurux badan tahay mar haddii aynaan hayn in sida ay u soo kala horeeyaanuun aynu u kala horaysiino. Waxaan soo horaysiin siday aniga illa tahay, arrimihii shalay laga hadlay aad iyo aad ayaan u raacsanahay si wacan ayaa loo hadlay, shir-guddoonkana waxaan ka codsanayaa in rabitaanka Golaha ee uu ku doodo ee lagu taageero inay aqbalaan oo socod siiyaan. Haddii aan hoos ugu dhaadhaco isu gayn gaynta, anigu waxaan odhan lahaa bal haddii ay soo dhakhsadaan saddex xeer ayuunbaan odhan lahaa ha loogu horaysiiyo oo muhiimad gaar ah ha la saaro, sidayn doonaan ha loo kala horaysiiyee.

Xeerarka doorashooyinka ee madaxweynaha, Golaha Wakiilada iyo Dawladaha hoose si gaar ah baa Golaha loogu cambaareeyaa, waxyaabaha aynu suuqa ka marri Kari waynay ayey ka mid tahay wax dambi ah oo aynu ku leenahayna ma jirto, dad siyaasad doonaya ayuunbaa inaga inagu xaga xagta. Waar bahalkaa aynu gees isaga riixno eeda aynaan lahayni ha inaga hadhee ilaa 10 sanno ayaa la lahaa bahalka ha la soo dhigee inaga soo dhiga taariikh wanaagsani ha inaga hadhee.

Sidii hore loo sheegay, Bangiga Ganacsi kama maarano mudanayaal, cid dawlad sheeganaysaa Bank ganacsi kama maaranto, bal imika elsii ayaa la furanayaa oo ma talan qofbaaba lacag dhiganaya, bal imika haddii aan lacag haysto meel aan dhigto ma hayo

anigu. Banan yar-yar ayaa dalka laga furayoo oo aan Bank Ganacsi ahayn. Taas waxaan leeyahay aynu ka saarno wixii dadku ka cabanayaa oo inaga iyo wadaadadu aynu ka wada shirnoo bahalkaa ha la soo celiyo oo deg deg ha loo sameeyo xoriyadeenii ayuu hortaagan yahay xeerkaasiye, sidaan halkan ugu ogayn ayuunbaa la yidhi waa la celiyey dee Gole waynuhu muu celin ee dood ayaa ka socotay ha la soo dhigo oo ama ha la diido ama ha la ogolaadee. Gole weynuhu wuxuu celiyo ayuunbaa noqon karra wax la celiyey.

Waxaan ku darayaa wax soo saarka dalka muhiimad gaar ayey leedahay wixii wax soo saar ah in si gaar loo qadariyaana way fiican tahay, hase ahaatee haddii ay bahaladii wada maqan yihiin Guddiyadii oo imika hadaad tidhaahdo Guddoomiye Barrito xeer aynu ka doodaynaa oo aanad xeerba aanad haynin maxaad la soo hordhigi, laakiin wuu ka hadhay kalfadhigii hore ee baaqiga noqday miyaanay kuwoodii oolin, kuwaas maxaa loo soo dhigi waayey oo xaga hore loo soo marin waayey.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** Bismilaahi, Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenka, Xildhibaanad, Shaqaalaha, Saxaafada, Martida, inta i maqlaysa, inta i dhagaysanaysa, inta I akhrin doonta dhammaantiin waa idin salaamayaa, Intaanan u gudo galin kala horaysiinta, waxaan ka horaysiinayaa oo aan ku dari lahaa ajandaha laba qodob oo ka dhiman oo labaduba laba muhiim ah, mid waa mid la xidhiidha doorashooyinka, midna waa mid la xidhiidha xaalada abaaraha. Gole ahaan masuuliyadeenu maaha oo kaliya in xeerar oo kaliya dul wareegno, laakiin xaaladaha dalka ka jira ee degdega ah in aynu ku darsano ajandaha oo aynu wax ka nidhaahno.

Ta ku saabsan doorashooyinka aniga oo qaba in la soo horaysiiyo labada xeer ee doorashooyinka iyo xeerka ismaamulka Degmooyinka iyo Gobolada, waxaan soo jeedin lahaa umaddu si badan ayey inoo eegaysaa, dacaayad badan baa meelahaas lala wareegayaa oo waxa la leeyahay goluhu isagaa diidan oo samaysanaya asbaabihii doorashadu dib ugu dhici lahayd. Waxaan uga mahadcelinayaa Guddoomiye Golaha Baashe oo si fiican u cadeeyey oo ka hadlay qof ahaan isaga oo afhayeenkii Golaha ah in Goluhu diyaar u yahay, laakiin anigu mid ayaan ku dari lahaa oon leeyahay ajandaha ha lagu daro ajandaha baaqa dhiirigelin ah oo aynu dhiirgelinayno xukumada iyo daneeyayaasha kelaba in doorashooyinkii la qabto xiligii lagu heshiiyey. Taasi meesha waxay ka saaraysaa xanta iyo xam-xamta dadka qaarkii meelahaas la wareegayaan, isaga oo Guddoomiyuhu ku mahadsan inuu mar hore ka hadlay, hadana uu noqdo baaqa guud oo aynu soo saarno, waa Qodob.

Qodobka labaad ee aan leeyahay ha lagu daro waa ka abaaraha, dabcan ama sharciyan ku dhawaaqida abaaraha waxa iska leh xukumada, laakiin haddii aad dhagaysanayseen ama aad la kulanteen xafiisyada dawlada ee ku shaqada leh bilihii ugu dambeeyey, sida Wasaarada Biyaha iyo Hay’adan qaabilsan arrimaha abaaraha labaduba waxay ku dhawaaqeen biyo la’aan iyo in xaalad biyo la’aan oo culusi jirto. Waxaan qabaa in baaqa aynu maanta soo saarnaa in laba siyoodba wax u qaban karayo, baaq kaliya maahee iyo

dabagal oo aynu Guddi samayno ama Guddida hawshan inoo qaabilsan oo aynu amarno inay hawshan dabagasho, laba wax ayuu tarayaa mid in aynu xukumadii kala shaqayno oo aynu ku dabagalno hawshii biyo la'aanta iyo abaaraha waxa talaabo ah ee laga qaaday iyo qorshaha loo samayno oo aynu dar-dargelino, ta labaadna, maadaama oo Madaxweyneheenii uu ku maqan yahay dalka isutaga Imaaraadka Carabta heshiiskuu aynu ansixinay ee saldhiga waxaan filayaa in Qodobkiisa 3aad farqadisa 5aad inuu ahaa oo ay ku qornayd in Xukumada Somaliland iyo Dawlada Imaaraadka carabtu ay iska kaashadaan wax ka qabashada aafooyinka dabiiciga ah waa qodob.

Sidaa darteed, in aynu adkayno iyada oo qodobkii la fulinayo Madaxweynuhuna uu fadhiyo Imaaraadka oo ay wada hadlayaan inaynu baaq soo saarno oo aanu ku eekaanin in aynu si guud uun u soo saarnee oo aynaan media uun kaga hadal ee aynu u gudbino safiirkeena Imaaraadka ileen waaka Madaxweyneheenii joogee oo aynu ka dhigno baaq Golaha ka soo baxay oo aynu kaga codsanayno qodob heshiiskii ka mid ahaa in ay nala hirgeliyaan. Sidaa daraadeed, haddii Golaha la igu taageero in lagu daro qodobkaas.

Kala horaysiinta, hadalkaygii hore ayaan ku soo daree waxaan soo horaysiin lahaa Xeerka Doorashooyinka oo Dadweynuhu ogaadaan, oo daneeyayaashu ogaadaan oo hadalkan lala wareegayo ee ah Golaha ayaa dib u dhigaaya meel iskaga tiirino. Waxa kale oo aan ku talin lahaa in la bilaabo wada tashiyo hawlo siyaasiya ayaa ku jira oo Saamiqaybsigii leh, kootadii haweenka leh, dadka laga tirada badan yahay leh in wiigan aynu ku jirno Guddida Arrimaha Guduhu wada tashigii bilawdo.

Xeerka Is-maamulka Degmooyinka iyo Gobolada, Xildhibaano badan ayaa ka hadlay Golaha Guurtidu muddo kordhin uma samaynin Golahayaasha Deegaanka xiligoodii wuu soo taagan yahay isaga aynu dedijino wixii laga qaban lahaa.

Waxa anugu aan ku dari lahaalaba xeer oo kaliya, kuwaas oo kala ah xeerka xawaalada iyo Xeerka Maydhida Lacagta, Xildhibaano ayaa ka dhawaajiyey in loo baahan yahay Xeerka ka ganacsiga Bangiyada, markaan anigu eego muddadii aan ka soo shaqaynayey Bangiyada wax iskaga xidhan xeerkaa laga qayliyay ee aynu dib u celinayee ee umaddii Somailand oo dhammi ka qayliday iyo xeerarka, makra waxaan leeyahay xeerkaas iyo xeerka Xawaaladaha wax isaga xidhani ma jiraan, sidoo kale xeerka maydhitaanka lacagta iyo xeerkii aynu celinay wax isaga xidhani ma jiraan, mid kalena, waxaan doonayaa in aan cadeeyo kalmada ah Banaanka Ganacsiga waa kalmada ay dhinac kaliya isaga taagaan, Bananka ganacsigu maaha kuwa Ribada ah ee wadamada aan Muslimka ahayni ku shaqaystaan.

Bananka Ganacsiga waxa ka mid ah Bananka Islamiiga ah, Bananka Islaamiga ahi waa kuwa ugu firfircoon Bananka ganacsiga, markaa dadkan qaba in baanan ganacsi aanay jirin xeerkii Bank ayeynu samaynay Banan ganacsi ayaa dalka ka jira oo saddex Bank oo Islaamiya ayaa codsiyadoodii la keenay in dalka laga furo, maanta waxa ugu faa'iido

badan baananka Ganacsiga ee islaamiga ah, haddii aynaan ribo ah doonayn waxa inoo furan baanan Islaamiya waxa inoo samaysan xeerkii Bananka Islaamiga ah ee ha lagu xigsiiyo Xaararka Xawaaladaha iyo Maydhida Lacagta. WSC.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne):-** Bismaalihi, ASC, Guddoomiye anigu badin maayo hadalka oo anigu ma hadal badni, laba qodob ayaan ka hadlayaa waa mide Xildhibaan Siciid waxaan ku raacsanahay Xeerka Doorashooyinka haddii aynu hayno weeye haddii aynaan hayn waxba kama qaban karnee, dadkii mid waliba wuxuu is leeyahay Golaha Wakiilada haysta waxa ugu horeeyaan waa saami-qaybsigii oo aan meel la dhigin, taasina inaga shaqadeena maaha.

Anigu waxaan garanayaa doorashadeenii markii ay dhici wayday Madaxweynihii ina Riyaale khayr Ilaahay ha siiyee Guddi ayuu u saaray saddexda Xisbi iyo Xukumada ah, saddexda Xisbi waxa ka mid ahaa Cabdiraxmaan Cirro oo Ucid ka socday, Madaxweynaha maanta Muuse Biixi oo Kulmiye ka socday iyo Xoghayihii UDUB ee dhintay Alle ha u naxariistee Maxamed Bulaale, aniga iyo dhawr nin oo kale waanu ku jirnay, raga talada hayaa waxay ahaayeen ragii ka ariminayey muddo 20 cisho ah ayey nagu qaadatay, waxaan leeyahay oo cida aan fariinta u dirayaa ay tahay saddexda Xisbi Qaran iyo Xukumada ayey hortaalaa arrinkaasi.Ta kale ee aan xildhibaan Siciid ku raacayaa waxay tahay in aynu u yeedhno Wasiirka Biyaha iyo Guddoomiyaha Hay'ada Nerad oo haddii inaga oo aan u yeedhin aynu wax iska soo saarno waxay noqonaysaa in wax badan inaga maqanaanayaan.

Waxaan ku darayaa xildhibaankii yidhi ma jiraan xeer diyaar ahi, anigu hadaanu nahay Guddida dhaqaalaha waxaanu intii fasax lagu jiray soo samaynay xeerka xawaaladaha iyo Xeerka Maydhida lacagta labadaasba waa naga diyaar oo shir-guddooka ayey horyaalaan.

Waxaan ku dari lahaa, markaxeerka aynu samayno Guddoomiye waxa jira kuwo umadda oo dhan saameeya oo waliba imika saamayn kugu leh iyo kuwo wakhti dheer saamayn ku leh bulshada xeerarka Xaawladaha iyo Maydhida Lacagtu waxay leeyhiin saamayn hadda joogta horena u joogtay joogi doonatana ilaa inta baanan la furaayo oo imika aad ka hadlayseen oo taagnaanaya oo muhiim ah. Sababtuna waxa weeye umadda Somaliland 80% xawaalada ayey ku nooshahay, lacagta la inoo soo diro ee xawaaladaha inoo soo martaa way ka badan tahay Miisaaniyadeena ssnadkii umada oo dhan miisaaniyadooda way ka badan tahay. 20% soo hadhayna 80% ayey la cuntaa macnaheeduna waxay tahay qof walba way gaadhaa miyi iyo magaaloba, anigu waxaan soo jeedinayaa labadaas xeer ee diyaarka ah in aynu ansixino kuwaas oo muhiimadeeda leh.

Maydhida lacagtu waa mid ku saabsan amniga qaranka (national Security) imika Madaarkeena waxa laga dhoofin jiray shandado lacag ah, waxaanu siinay talooyin ku

saabsan in Bangi kasta lagu cashuuro inta uu leeyahay, haddii la ogaaday lacagta hawada maraysa ee aan la ogayn cida ku shaqaynsa.

Haddii ay noqoto mid wax xadda iyo haddii aynu noqoto mid qalaale kaleba wada waa wax amingeena saameyn ku leh, markaa guddoomiye waxaan ku soo gebo gabeynayaa oo aan ka filayaa Xildhibaanada saaxiibaday ah inay ansixiyaan.

**Guddoomiye:** Doodii way dhammaatay, waa la isku soo gurayaa, waxaan u sheegayaa Xildhibaanada in aanan ajanadaha aanan ku darinin xeerar maqan ee xeerarka ay hayaan Guddiyadu lagu saleynayo, waxaana farayaa Guddiyada in ay Xeerarka barrito soo Guddbiyaan, fadhigu wuu inoo idhan yahay waa inoo barrito.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ___________________________ | ___________________________ |